



2022-2023 Xusuus-qorka Fasalka 7aad ee waalidiinta

Waa maxay? Sannad kasta Caafimaadka Dadweynaha Ottawa waxay abaabushaa rugaha tallaalka ee dugsiga ilmahaaga.

Goorma? Waxaanu bixin doonaa rug caafimaad xilliga dayrta iyo gu'ga. Ka eeg linkiga soo socota taariikhaha: <http://www.parentinginottawa.ca/immunization>

Waa maxay tallaalka la bixiyaa?

Tallaalka	Immisa garoojood?	Yaa uqalma?
Meningococcal (Menactra® ama Nimenrix®)	1 garoojo	Dhammaan ardayda fasallada 7aad ilaa 12aad *Waa waajib ilaa fasalka 7aad
Huyuman Babilimofayras (Gardasil® 9)	2 garoojo ama 3 garoojo (iyadoo ku xidhan da'ada)	Dhammaan ardayda fasalka 7aad ilaa 12aad students
Cagaarshow B (Engerix®-B ama Recombivax®)	2 garoojo ama 3 garoojo (iyadoo ku xidhan da'ada)	Dhammaan ardayda fasalka 7 ilaa 12

Sidee ilmahaagu u qaadanayaa tallaalka?

- Dhammaan ardayda fasalka 7 (ardayda dhashay 2010), waxay helayaan xidhmo wata foomka oggolaanshaha cagaarshow B, babilimofayras (HPV) iyo tallaalka cudurka meningokokal.
- Tallaaladan si guud ayaa loo maalgeliyaa, markaa wax lacag ah looma baahna.
- Kala hadal ilmahaaga wixii ku saabsan tallaalka.
- Adiga iyo ilmahaaga waxaad u baahan tihii inaad saxeexdaan foomka oggolaanshaha tallaalka KASTA oo aad rabto in ilmahaagu qaato
- Xitaa haddii aadan rabin in ilmahaaga la tallaalo, buuxi foomka oggolaanshaha ee tilmaamaya "Maya" dhammaan tallaalkada aadan rabin in ilmahaagu qaato.

Maalinta xarunta caafimaadka, ilmahaaga waa inuu:

- Cunaa quraac wanaagsan.
- U soo qaata iskuulka sharaab ama cunto fudud.
- Xirtaa funaanad gacmo gaaban ama shaadh dabacsan si cududda sare si sahal ah ugu soo baxdo, iyadoon la qaawin.
- Soo qaataa maaskaha uu xidho wakhtiga xarunta caafimaadka.
- Keenaa foomka oggolaanshaha iskuulka.

Fadlan ogsoonow: Badbaadada, sirta, iyo hufnaanta darteed, ma awoodno inaan qaabilno waalidiinta raba inay la joogaan ilmahooda xilliga tallaalka ee xarumaha caafimaadka ee dugsigeenna. Si aad ugala hadasho waxyaabo kale sida xarumaha caafimaadka la qabsiga bulshada fadlan wac 613-580-6744.

Haddii ilmahaagu ka baaqdo tallaalka xarunta caafimaadka ee dugsigooda, ama haddii aad hayso su'aalo ku saabsan tallaalkada, fadlan wac Caafimaadka Dadweynaha Ottawa 613-580-6744 oo weydii inaad la hadasho kalkaaliye.